# Cadeey

## Tabta baro

1. **Fikradaada ka dhiibo:** Ilmahaaga weydii fikrado ama wax sheekada ku saabsan. Kuwan waxay noqon karaan wax kasta, xitaa wax la mid ah *Wiilkan waa doqon!*

2. **U sheeg tafaasiisha si ay fikradaada u waafaqdo:** Ilmahaaga ku martiqaad inuu caddeeyo iyagoo sheegaya tusaalayaal sheekada ku jira, sida *Ilmahan nacaska ah ayaa isku dayay inuu bisadda u qubeeyo!*

3. **Buugga ka hel sawirro ama erayo caddaynaya fikraddaada/fikirkaaga:** Carruurta da'da yar waxay tilmaami karaan sawirro, carruurta waaweyna indhaha ayay marin karaan bogga si ay u helaan erayo ama weedho.

**Waa maxay sababta tabtan?**

Ka hadalka jilayaasha iyo waxa sheekada ka dhacaya waa wadahadal xiiso leh! Markaan dib ugu milicsano sheeko oo aan ugu dhex raadinyo cadeyn ama tusaalooyin si aan u xoojino fikirkeena, waxaan si fiican aan u fahamaynaa sheekada.

## Ubadkaaga weydii

*Carruurta da'da yar:*

- Ka waran sheekadan?
- Muxuu jilaagu yiri ama sameeyey si aad sidaas ugu fikirto? Goormee?
- Tilmaan sawirka meesha uu ka caddaynayo.

*Carruurta weyn:*

- Kan waran fikradahaaga ka dib markaad tan aad akhrisay? Taas wax badan iiga sheeg.
- Buugga iga dhex tus halka aad fekirkaas ka heshay. Sidee bay taas ku caddaynaysaa fekirkaaga?
- Maxay kula tahay tan ku saabsan in is-af-garadwaaga ama dhibka sheekadan ay noqon doonto? Maxaa caddaynaya qoraalka oo fekirkaaga taageeraya?

## Ku celcelis ciyaar leh

Ciyaar "Caddeey!" ciyaar

- Waraaq ku qor shan oraah oo kala duwan. (tusaale *Mugulaal waa xaywaan in la rabaadaysto ku wanaagsan.)*
- Qofka ugu horreeya wuxuu ku qorayaa waraaq oo kor ayuu u akhrinayaa.
- Qofka labaad waxa uu sheegayaa tafaasiil ama cadaymo caddaynaya in bayaanku yahay **run**. (tusaale *Way fududahay in la daryeelo.*)
- Markaa qofka koowaad wuxuu sheegayaa tafaasiil si uu u caddeeyo bayaanku **aanu ahayn mid run ah**. (tusaale *Dadka qaar ayaa xasaasiyad ku qaba)*
- Ku soo celceliya ilaa qof uu ka dhammaanayo faahfaahinta.
- Xaashi cusub ku sawir oo beddel cidda kor u akhrida marka hore.